# Farriinta Agaasimaha

Farriintan waxaa la soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

**Taariikhda:** Sibteembar 30, 2025

**Ku socota**: Dadka deggan Qaybta Dejinta iyo Qalalaasaha (SACU) iyo masuuliyiintooda, xubnaha bulshada I/DD iyo shaqaalaha ODDS

**Ka socoto:** Darlene O'Keeffe, Agaasimaha Ku-meelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS), iyo Winston Brown, Agaasimaha Ku-meelgaarka ah ee Qaybta Xasilinta iyo Xasarada (SACU)

**Mawduuca:** **Martiqaadka fadhiga dhegaysiga ee SACU**

Salaan,

Waxaanu haynaa warbixin cusub oo ku saabsan Qaybta Xasilinta iyo Xasaradda (SACU). Bishii Agoosto, ODDS waxay bulshadu ku wargelisay wax ku saabsan shaqada aan samaynayno si aan dib ugu qiimeyno sida SACU u shaqeyso. Sharci-dejinta Oregon waxay noo tilmaameen inaanu dejino qorshe hawleed loogu talagalay SACU.

Iyadoo hannaankaas qayb ka ah, waxaanu qabanaynaa kulan dhegaysi bisha Oktoobar. Waxaanu kulano fool-ka-fool ah ku qaban doonaa goobo ka ag dhow guryaha SACU ee hadda. Waxaanu sidoo kale u qaban doonaa kulano dhanka fogaan arag ah ciddii aan si fool-ka-fool ah u iman karin.

## Maxaa ka dhex dhici doonaa kulamada dhegaysiga?

Shaqaalaha ODDS waxay:

- Wadaagi doonaan guudmar ku saabsan sida SACU u shaqayso
- Warbixin ka bixin doonaa sida shaqadeenu u daboolayso wareegtada Sharciga
- Ka qaybgelayaasha ku martiqaadi doontaa inay la wadaagaan walaacyadooda, su'aalahooda, iyo khibradahooda la xiriira SACU
- Dhegaysan doonaan jawaabcelintiina.

## Yay tahay inay ka qaybgalaan kalfadhiyadda dhegaysiga?

**Waxaanu ku martiqaadaynaa dadka ay u adeegaan SACU iyo qoysaskooda iyo ciddii ka masuul ahba inay yimaadaan.** Waxaan rabnaa inaan maqalno warkaaga, si shaqadeena ay u qaabeeyaan khibradaada iyo baahiyahaaga. Haddii aadan ka qaybgelin karin kulanka ama aad rabto inaad si gaar ah ula hadasho, fadlan iimayl u dir sacu.execteam@odhs.oregon.gov. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa maamulaha guriga SACU. Waxay kugu xiriirin doonaan qof shaqaalaheena ka mid ah oo si gaar ah kuula hadli doona.

**Kulanadu dadwaynaha ayay u furan yihiin.** U doodayaasha ka socda xubnaha bulshada I/DD iyo bulshada guudba waxaanu ku dhiiragelinaynaa inay yimaadaan. Haddii aad rabto inaad qayb ka noqoto wada-hadalka, fadlan kaalay.

**Adeeg bixiyayaasha I/DD iyo maamulkooda**, waan idin soo dhawaynaynaa ee ka soo qaybgala. Waxaanu idinku martiqaadaynaa inaad wax nala dhegaysataan oo nala barataan. Dhowaan waxaan qaban doonaa kulamo dheeraad ah oo aan warkiina toos ugu maqlayno. Xubnaha guddida maamulaysa Mashruuca Dib u qaabeynta SACU ayaa toos idiinkala soo xiriiri doona fursadahan.

# Goorma iyo xaggee ayay ka dhacayaan kulamadu? Sidee ayaan uga qaybgalaa?

Waxaanu dhacdooyinka fool-ka-foolka ah ku qabanaynaa shan goobood. Sidoo kale munaasabad fogaan arag ah ayay yeelan doontaa goob kastoo kuwaas ka mid ah. Dadka aan fool-ka-fool uga soo qaybgeli karin waxay kaga qaybqaadan karaan Zoom. Goobahan waxaan ku dooranay sababtoo ah waxa hadda ku yaalla guryo SACU goboladaas. Fadlan kaga qaybgal goobta ugu dhow meesha aad ku nooshahay.

Kulamada fool-ka-foolka ah waxay socon doonaan laga bilaabo 10ka subaxnimo illaa duhurka. Kulamada fogaan aragana waxay soconayaan laga bilaabo 4ta galabnimo illaa 6da fiidnimo.

Waa kan macluumaadka kulanka oo goob loo eegay. Wixii macluumaad ah ee u saabsan goobta, isticmaal gujoraaca ku qoran magaca goobta.

## Eugene

### Kulanka fool-ka-foolka ah

- **Taariikhda:** Oktoobar 20, 2025
- **Waqtiga:** 10ka subaxnino illaa duhurka ee Waqtiga Baasifiga
- **Goobta:** Xarunta Adeegyada Madadaaladda iyo Baxnaanada ee Hilyard Community Center
  2580 Hilyard St.
  Eugene, OR 97405

### Kulanka Zoom ee aagga Eugene

- **Taariikhda:** Oktoobar 20, 2025
- **Waqtiga:** 4ta galabnimo illaa 6da fiidnimo ee Waqtiga Baasifiga
- **Sida loo xaadirayo:** Isticmaal gujoraaca si aad isku diiwaangeliso. Zoom-ka ayaa kuu soo diri doona iimayl xaqiijin ah. Waxaa wehlin doona tilmaamaha sida loogu biiro kulamada.

## Corvallis

### Kulanka fool-ka-foolka ah

- **Taariikhda:** Oktoobar 21, 2025
- **Waqtiga:** 10ka subaxnino illaa duhurka ee Waqtiga Baasifiga
- **Goobta:** Tunison Community Room
  365 SW Tunison
  Corvallis, OR 97333

### Kulanka Zoom ee aagga Corvallis

- **Taariikhda:** Oktoobar 21, 2025
- **Waqtiga:** 4ta galabnimo illaa 6da fiidnimo ee Waqtiga Baasifiga
- **Sida loo xaadirayo:** Isticmaal gujoraaca si aad isku diiwaangeliso. Zoom-ka ayaa kuu soo diri doona iimayl xaqiijin ah. Waxaa wehlin doona tilmaamaha sida loogu biiro kulamada.

## Salem

### Kulanka fool-ka-foolka ah

- **Taariikhda:** Oktoobar 27, 2025
- **Waqtiga:** 10ka subaxnino illaa duhurka ee Waqtiga Baasifiga
- **Goobta:** Pringle Community Hall
  606 Church St. SE
  Salem, OR 97301

### Kulanka Zoom ee aagga Salem

- **Taariikhda:** Oktoobar 27, 2025
- **Waqtiga:** 4ta galabnimo illaa 6da fiidnimo ee Waqtiga Baasifiga
- **Sida loo xaadirayo:** Isticmaal gujoraaca si aad isku diiwaangeliso. Zoom-ka ayaa kuu soo diri doona iimayl xaqiijin ah. Waxaa wehlin doona tilmaamaha sida loogu biiro kulamada.

## Portland

### Kulanka fool-ka-foolka ah

- **Taariikhda:** Oktoobar 29, 2025

- **Waqtiga:** 10ka subaxnino illaa duhurka ee Waqtiga Baasifiga
- **Goobta:** Multnomah Arts Center
  7688 SW Capitol Highway
  Portland OR, 97216

### Kulanka Zoom ee aagga Portland

- **Taariikhda:** Oktoobar 29, 2025
- **Waqtiga:** 4ta galabnimo illaa 6da fiidnimo ee Waqtiga Baasifiga
- **Sida loo xaadirayo:** Isticmaal gujoraaca si aad isku diiwaangeliso. Zoom-ka ayaa kuu soo diri doona iimayl xaqiijin ah. Waxaa wehlin doona tilmaamaha sida loogu biiro kulamada.

## McMinnville

### Kulanka fool-ka-foolka ah

- **Taariikhda:** Oktoobar 30, 2025
- **Waqtiga:** 10ka subaxnino illaa duhurka ee Waqtiga Baasifiga
- **Goobta:** Chemeketa Community College
  Yamhill Valley Campus
  Room 101 and 103
  288 NE Norton Lane
  McMinnville, OR 97128

### Kulanka Zoom ee aagga McMinnville

- **Taariikhda:** Oktoobar 30, 2025
- **Waqtiga:** 4ta galabnimo illaa 6da fiidnimo ee Waqtiga Baasifiga
- **Sida loo xaadirayo:** Isticmaal gujoraaca si aad isku diiwaangeliso. Zoom-ka ayaa kuu soo diri doona iimayl xaqiijin ah. Waxaa wehlin doona tilmaamaha sida loogu biiro kulamada.

## Waxaan u baahanahay in la iiga caawiyo ka qaybgalka kulanka. Waa maxay taageerooyinka ODDS bixinayaan? Sidee baan u dalbadaa taageerooyin dheeraad ah?

Waxaanu doonaynaa in qof walba uu dareemo soo dhaweyn iyo badqab. Taageero bilaash ah ayaanu ku siin doonaa si aad si buuxda uga qaybqaadato, oo ay ku jirto:

- Luuqadda Farahadalka Mareekanka
- Turjubaan Isbaanish
- Qoraal-hoosaad toos ah
- Si aad u hesho luuqadaha kale ama taageerada, ODDS ka wac lambarka 503-945-5811 ama iimayl ugu dir DD.DirectorsOffice@odhs.oregon.gov. Fadlan ku soo gudbi codsigaaga 48 saacadood ka hor kulanka aad ka qaybgeli doonto.

## Ka warran haddii aan ka qaybgeli kari waayo laakiin aan rabo inaan ra'yi dhiibto?

Fadlan ra'yigaaga ku soo dir sacu.execteam@odhs.oregon.gov. Xubin ka tirsan kooxda SACU ayaa kugu soo warcelin doonta.

## Maxaan ku sameyn doonaa jawaabcelinteena?

Jawaabcelintaadu waxay kaalmo ka geysan doontaa qorshaha mustaqbalka ee SACU. Aad ayaad u mahadsan tahay.

## Maxaa ku dhacay jawaabcelintii dadku sannadkan horraantiisa idin siiyeen?

Horraantii sannadkan, jawaabcelin ayaanu ka uruurinay wax ka badan 280 xubnaha bulshada ah. Waxaanu shaqadan qandaraas kula galnay Human

Services Group. Haddii aad mashruucan ka qayb ahayd, waad mahadsan tahay. Ra'yigaagii wuxu macluumaad ku biiriyay warbixin aan u gudbinay Sharci-dejinta Gobolka Oregon bishii Maajo. Kulamada dhegaysiga ee soo socda taas ayay sii kobcin doonaan.

## Su'aalo ayaan qabaa. Sidee ayaan u heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Haddii aad qabto su'aalo, iimayl u soo dir sacu.execteam@odhs.oregon.gov. Waxaanu soo dhigaynaa dukumeentiyada bogga mareegta SACU.

Waxaanu rajaynaynaa inaanu kugula kulano fadhiyada dhegaysiga. Waad ku mahadsan tahay jawaabcelintaada iyo iskaashigaaga.

Nabadgelyo,



Darlene O'Keeffe, Agaasimaha kumeelgaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon



Winston Brown
Agaasimaha ku-meelgaarka ah, Qaybta Xasillinta iyo Xasaradaha
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon

---

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-

5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

**Khayraadka**

- Isku diiwaangeli warbixinnada ODDS.
- Wax ka ogow dhacdooyinka ODDS.
- Isku diiwaangeli warbixinnada Adeegyada Aadanaha ee Oregon.
- Akhri farriimo ka socdo ODDS.
- Naga soo raac Facebook @oregondhs.idd